

Lambarka Taxanaha **604.7.2.4.1P** La meelmariyay **Maarso 1982**  
Dib-u-eegis lagu sameeyey **Janaayo 2024**

Ciwaanka **Safar Aqoon Kororsi Habeen Ah – Xogta iyo Oggolaanshaha Daaweynta Caafimaad ee Ardayga**

**Shaqaalaha:** Dhammeystir qeybtan oo ku dheji faahfaahinada safarka aqoon kororsiga ee dheer ah sidi loogu baahdo

**Faahfaahinada iyo taariikhaha safarka aqoon kororsiga ee habeenkii ah:**

---

---

---

Haddii sanduuqan sax la saaro, goobta/xarunta safarka aqoon kororsiga waxay u baahan tahay buuxinta **foom oggolaansho ama ka dhaafitaan** oo gaar ah oo ay tahay in lala soo celiyo foomkan.

**Waalidka/Masuulka:** Foomka oo dhammeystiran kusoo celi macalinka canugaada ugu dambey

Macluumaadka ayaa loo baahan yahay si looga qeybqaato safarka. Ku guuldarreysiga in la bixiyo macluumaadka la codsaday waxay keeni kartaa luminta uqalmitaanka kaqeybqaadashada.

Macluumaadka waxaa lala wadaagi doonaa shaqaalaha iskuulka iyo masuuliyiinta maamuleysa safarka waxaana loo adeegsan doonaa, sidi loogu baahdo, in looga jawaabo baahiyaha canugaaga.

Magaca ardayga \_\_\_\_\_ Fasalka \_\_\_\_\_ Taariikhda dhalashada \_\_\_\_\_

Ciwaanka goobta ee ardayga (wadada, magaalada, koodhka boostada) \_\_\_\_\_

Magaca waalidka ama mas'uulka \_\_\_\_\_ Ciwaanka iimaylka \_\_\_\_\_

Taleefan lambarka(lambarada) waalidka ama mas'uulka oo wata furaha aagga (taleefanka guriga)  
(taleefanka shaqada) (taleefanka gacanta)

Magaca iyo taleefan lambarada deriska ama qaraabada \_\_\_\_\_

Bixiyaha caymiska \_\_\_\_\_ Lambarka siyaasadda \_\_\_\_\_ Lambarka kooxda \_\_\_\_\_

**Macluumaadka Caafimaadka**

- Haa  Maya Canugaagu miyuu qabaa **wax** xasaasiyad ah oo la yaqaano? Haddii ay haa tahay, waa maxay? \_\_\_\_\_
- Haa  Maya Canugaagu ma qaataa EpiPen (dawada xasaasiyadda)? \_\_\_\_\_
- Haa  Maya Canugaagu ma qaataa dawo? Fadlan tax/qor: \_\_\_\_\_

Magaca daawada \_\_\_\_\_ Kuurada \_\_\_\_\_ Waqtiga La Qaatay \_\_\_\_\_  
Sababta

Magaca daawada \_\_\_\_\_ Kuurada \_\_\_\_\_ Waqtiga La Qaatay \_\_\_\_\_  
Sababta

**\*\*\*Fadlan xusuusnow in aad dhammaan dawooyinka loo baahan yahay kusoo dirto**

**weelashoodii asalka ahaa\*\*\***

Haa     Maya    Canugaagu ma qabaa wax arrimo jireed ah, qalliin (sanadki la soo dhaafay gudihiisa ah) ama walaacyo caafimaad oo kale oo saameyn ku yeelan kara waxqabadka canugaaga ama ay lagama maarmaan u tahay dhakhtarku inuu ogaado marka uu daryeelayo canugaaga?  
Fadlan tax/qor:\_\_\_\_\_

Taariikhda tallaalkii teetanada ee ugu dambeeyey (bisha/maalinta/sanadka) \_\_\_\_/\_\_\_\_/\_\_\_\_

**Oggolaanshaha Daaweynta Caafimaad** (marka ay timaado jirro, dhaawac ama xaalad degdeg ah, waxaa laga yaabaa inay lagama maarmaan noqoto in la daweeyo ama daryeel loo raadiyo canugaaga ka hor inta aanay shaqaaluhu kula soo xiriirin.) Markaan saxiixo xagga hoose, Anigoo ah (waalidka/qofka mas'uulka ka ah ardayga ama arday qaangaar ah oo jira 18 sano ama kaweyn\*) waxaan oggolaaday in Dugsiga Madaxa Banaan ee Degmada 196 (Degmada 196) uu awood buuxda u yeesho inuu qaado tallaabadi ula muuqata inay lagama maarmaan u tahay ilaalinta caafimaadka, badbaadada iyo badqabka ardaygayga inta lagu jiro safarka aqoon kororsiga. Awoodda noocan ah waxaa ku jiraya u oggolaanshaha, marki lagama maarmaan ay tahay:

- Daaweynta, gargaarka koowaad iyo daaweynta, oo ay ku jiraan kuwa kor lagu soo aqoonsaday,
- Daaweyn caafimaad oo sugan (oo uu ku jiro qalliin) oo ka socota shaqaalaha caafimaadka ee maxalliga iyo xarumaha caafimaadka, iyo/ama
- In canugeyga loo soo diro guriga si loo daweeyo.

Waxaan xaqiijinayaa, ilaa inta aan ka ogahay, in ardaygayga uu jir ahaan iyo maskax ahaanba awoodo inuu kaqeybqaato safarka aqoon kororsiga ah iyo waxqabadyadiisa. Intaa marka laga yimaado, inta aanu ardaygayga kaqeybqaadan safarka aqoon kororsiga, waan fahamsanahay in la iiga baahan karo in aan bixiyo macluumaad caafimaad oo dheeraad ah.

### **Ka Dhaafidda Qaan Sheegashada**

Waxaan fahamsanahay oo aan ka warqabaa in safarkani aqoon kororsiga ah uu ku lug leeyahay halis dhaawac ama jirro oo soo gaarta ardaygayga, oo ay ku jiraan laakiin aanay ku koobneyn khatarta ah in uu ku dhaco caabuqa COVID-19 iyo/ama la karantiilo kahor, inta lagu jiro ama kadib safarka. Waxaan si xor ah oo iskay ah u qaadanayaa una aqbalayaa khatartan ku imaan karta nafteyda iyo anigoo ka wakiil ah ardaygayga. Aniga oo saxiixaya xaga hoose tixgalinayana Degmada 196 ee u oggolaatay ardaygayga in uu kaqeybqaato howshan, waxaan aqbalayaa aniga oo ka wakiil ah naftayda iyo tan ardaygayga in aanan wax mas'uuliyad ah u raacanaynin Degmada 196, shaqaalaha iyo mutadawiciinta wixii ku saabsan iyo dhammaan dhaawacyada, naafanimada, dhimashada, dhibka, kharashka ama waxyeellada soo gaarta qof ama hantida kuwaas oo ka dhasha kaqeybqaadashada ardaygayga ee safarka aqoon kororsiga. Ka dhaafiddu waxay meesha ka saaraysaa dacwadaha ku salaysan dayacaadda caadiga ah, laakiin meesha KAMA saarayso dacwadaha ku salaysan dayacaadda guud ama khaladaadka ulakaca ah ama kaska ah.

### **Filashooyinka, Habraacyada iyo Joojinta Kaqeybqaadashada**

Waxaan akhriyey oo dib-u-eegay "Filashooyinka iyo Habraacyada Safarka Aqoon Kororsiga Habeenka Ah" ee ku lifaaqan waxaana kala hadlay ardaygayga. Waxaan fahamsanahay in ardaygayga laga filayo inuu u hoggaansamo habdhaqanka ay ka fileyso Degmada 196, heerarka barnaamijka iyo dhammaan shuruucda maxalliga ah, iyo in ardayga laga mamnuuci karo inuu kaqeybgalo safarka, guriga loo diri karo inta lagu jiro safarka iyo/ama lala tiigsan karo cawaaqibta Degmada 196 marka uu ku guuldarreysto in uu sidaa sameeyo.

Waxaan aqbalayaa in aan bixiyo dhammaan kharashka ka dhasha waxaana garowsanahay in wax lacago ah aan lasoo celin doonin haddii ardaygayga lagu soo celiyo guriga ama laga reebo inuu kaqeybgalo safarka sababo anshax-xumo ah awgood.

### **Wax Ka Beddelka Barnaamijka ama Joojinta Degmada 196**

Waxaan garowsanahay in Degmada 196 ay xaq u leedahay inay wax ka beddesho qorshaha safarka iyo inay hagaajiso kharashaadka iyo khidmadaha joojinta si ay u muujiso isbeddelada nooc kasta oo ka baxsan awooda Degmada 196, sida isbeddel kasta oo ku yimaada kharashka safarka, arrimaha la xiriira aafada caabuqa, iwm. Waxaan

fahamsanahay Degmada 196 in ay sidoo kale xaq u leedahay inay kansasho/baajiso safarka iyada oo ay ugu wacan tahay kaqeybqaadasho aan ku filneyn ama sababo duruufo kale oo ka baxsan awoodeeda, oo ay ku jiraan, laakiin aanay ku koobneyn, duruufaha la xiriira aafada caabuqa COVID-19. Waxaan garowsanahay in khidmado kasta oo joojin ah oo ku yimaada duruufaha noocaas ah ay dhaqangeli doonaan iyo in lacago aan la isu celin doonin haddii ay dhacdo in la baajiyo, waxaan fahamsanahay inay tahay mas'uuliyad ii keli ah in aan ka caymiyo khatarta khasaaraha, oo ay ku jirto khatarta joojinta safarka mana u qabsan doono degmada dugsiga wax mas'uuliyad oo ah khasaare kasta oo maaliyadeed oo la xiriira joojinta safarka.

### **Ku Guuldarreysiga Lacag Bixinta ama Dhammeystirka/Helitaanka Waraaqaha Shaqada ee Lagama Maarmaanka ah**

Waxaan fahamsanahay in aan mas'uul ka ahay bixinta kharashaadka/khidmadaha ku baxaya safarkan la iigana baahan karo inaan buuxiyo waraaqo shaqo oo dheeraad ah kahor inta aanu ardaygayga kaqeybgelin safarka. Waxaan aqbalay in Degmada 196 ay baabi'in karto kaqeybgalka ardaygayga ee safarka aqoon kororsiga sababo ah ku guuldarreysiga bixinta wixi lacago la isaga baahnaa oo lagu bixin waayo waqtigii loogu talagalay ama ku dhammeystir la'aanta waqtigii loogu talagalay ee waraaqaha shaqada ee loo baahan yahay. Xaaladahaan oo kale, khidmaha joojinta ayaa dhaqangal ah waxaana laga yaabaa in lacag celin aan la heli karin.

Waxaan fahamsanahay inay tahay mas'uuliyadeyda in aan codsado oo aan helo caddeynti kasta oo tallaah ah oo lagama maarmaan ah ama wixi dukumiintiyada kale ah oo laga rabo ardaygayga si uu u booqdo ugana soo laabto meesha loo socdo. Waxaan garowsanahay in aan wax lacago ah aan la isu celin doonin haddii lagu guuldarreysto helitaanka dukumiintiyada safarka ee saxda ah.

### **Oggolaanshaha**

Anigoo saxiixaya foomkan, waxaan garowsanahay in aan akhriyey oo aan aqbalay qodobada kor ku xusan oo aan ardaygayga u oggolahay inuu tago oo uu kaqeybqaato safarka aqoon kororsiga ah. Waxaan fahamsanahay in aysan waajib igu ahyn in aan u oggolaado ardaygayga inuu kaqeybgalo safarka aqoon kororsiga oo, haddii aan doorto in aanan u oggolaan, ardaygayga waxaa laga filayaa inuu dhigto iskuulka maalinta(maalmaha) lagu maqan yahay safarka aqoon kororsiga.

**Magaca waalidka/magaca mas'uulka/magaca ardayga qaangaarka ah (far waaweyn ku qor):** \_\_\_\_\_

**Saxiixa waalidka/mas'uulka/ardayga qaangaarka ah:** \_\_\_\_\_

*\*Dhammaan tixraacyada "ardaygayga" waxaa loo fahmayaa inay yihiin "ani" ama "Aniga" wixi ku aadan arday qaangaar ah oo saxiixaya foomkan.*